

Qof aad taqaan guur ama wada noolaansho wax ma lagu yeellay?

SOMALI



Tusaha qoysaska, saaxiibada iyo deriska
Caawimadaada ayaa wax ka bedeli karta



Domestic Violence
Resource Centre Victoria



Waxaa wadajir u diyaariyey una daabacay Hay'ada Kaalmada Dhibanayaasha (VSA), iyo Xarunta Macluumaadka Wax-ka-qabashada Rabshada Guriga Fiktooriya (DVRCV).

Waxaa la cusboonaysiiyey oo dib loo daabacay sanadihii 2001, 2006, 2009.

Naqshada waxaa sameeyey Celsius Design.
Waxaa daabacay Big Print.

Hay'ada Kaalmada Dhibanaha iyo Xarunta Macluumaadka Rabshada Qoyska Fiktooriya waxay si qadarin leh u aqoonsan tahay xubnaha bulshada iyo adeegyada doorka ka qaatay horumarinta tusahaan. Khaasatan, waxaanu jeclaan lahayn in aan u mahadnaqno kuwa nagala hadlay wixii ku saabsan waxyeellada iyaga lagu sameeyey oo doonaya inay xaqiijiyaan in dhibanayaasha kale oo dhibta loo geestay la siiyo kaalmada ay u baahan yihiin.

© Xuquuqda koobiga Xukuumada Fiktooriya ee 2009. Qoraalkaan xuquuqdiisa dad baa leh. Ma jirto qayb ka mid ah oo dib loo daabici karo marka laga reebo sida waafaqsan shuruuda Xeerka xuquuqda ee 1968.

Tusayaashaan waxaa lagu heli karaa 13 luqadood: kuwaas oo kala ah: Carabi, Barmiiis, Jayniis, Karooweeshiyan, Dari, Dinka, Faarsi, Masidooniyan, Seerbiyan, Soomaali, Isbaanish, Turkish, iyo Fiyatnaamiis. Si aad u hesho koobiyadaan fadlan booqo www.justice.vic.gov.au/victimsofcrime ama www.dvrcv.org.au

AHaddii kale, fadlan ka wac Khadka Caawimada Dhibnaha dembiga loo geestay 1800 819 817, 8:00 subaxii – 11.00ka habeenimo Isniinta ilaa Jimcaha, marka laga reebo maalmaha ciidaha, ama la xiriiir Xarunta Macluumaadka Rabshada Guriga Fiktooriya (03) 9486 9866 ama email u dir dvrcv@dvrcv.org.au

Tusmada

| | |
|---|----|
| Hor-u-dhac | 2 |
| Waa maxay dhibaatayntu? | 4 |
| Sidee ku aqoonsan karaa waxyeellaynta ama dhibaataynta? | 5 |
| Maxay u goyn weyday xiriirka guurka? | 7 |
| Door ma ka qaadan karaa? | 10 |
| Sidee ula hadli karaa? | 10 |
| Maxaan samayn karaa si aan u caawimo? | 11 |
| Maxaan la samaynayn | 15 |
| Ka caawimida siyaadinta amnigeeda | 16 |
| Sharciyada xafi di kara iyada | 18 |
| Maxaan samayn karaa haddii aan markhaanti ka noqdo ama dusha ka maqlo rabshad ama cabsigelin? | 22 |
| Is-amaan gelintaada | 23 |
| Sidee wax uga qaban karaa qofka la nool oo dhibta keenaya? | 24 |
| Adeegyada caawimi kara | 27 |



Hor-u-dhac

Waxay run ahaan noqon kartaa wax laga welwelo marka qof aad taqaan wax gaaraan ama uu dhibaato u geysto qofkay wada nool yihiin. Tusahaani wuxuu ku siin doonaa macluumaad wax ku oolla oo la xiriira sida lagu caawimo, iyo sida naftaada lagu xafido ama loo ilaaliyo.

Tusahaani wuxuu caawimayaa kaalmaynta dumarka iyo ragga dhibaataada loo geystay. Tusahaan oo dhan waxaa la isticmaali doonaa erayga 'iyada' si loo sahlo waxaan iyana shaki lahayn in dhibanayaasha badankood yihiin dumar, si kasta ha ahaatee, waxaanu ku dhiirigelinaynaa taageerayaasha ragga dhibta loo geystay in ay isticmaalaan tusahan.

Waxaad la xiriiri kartaa adeegyada lagu taxay qoraalkaan si aad ula hadasho qof si qarsoodi ah wixii ku saabsan welwelka aad qabto.



'Saaxiibtay ayaa runtii I caawintay. Weligeed iguma eedayn wixii dhacay ama ima dareensiin inay qaladkayga tahay. Waxay iga caawintay in aan ka fekeri wixii aan samayn lahaa, waxay daryeeshey carruurtaada si aan u nasto, mar walbana diyaar ayey u ahayd inay I caawinto. Iyada uma ay sahlayn. Laakiin caawimadeedu wax badan ayay bedeshay.' Ana.

Caawimadaada ayaa wax weyn u samayn qof dhibaato loo geystay.

Jawaabta aad siinayso xaalladeeda waa mid muhiima. Haddii ay dareento in la caawimay lana dhiirigeliyey, waxay dareemi kartaa kalsooni waxayna awoodi doontaa inay samayso go'aan wanaagsan. Haddii ay dareento in la eedeeyey lana xakumay, waxay ka biqi kartaa inay wax u sheegto qof kale wixii ku saabsan dhibta loo geystay.

Qof walbaa waa noqon kara dhibane ama abuuraha rabshada qoyska, badanaana waxaa ragga ayaa dumarka gala ka gala iyo dad kale oo u nugul dhibta. Xataa carruurta marka aanay toos lug ugu yeellan, inay ka markhaanti noqdaan dhibta ama bixiyaan natiijda dhibta ayaa saamayn weyn ku yeellan karta.

Dhibta, ama rabshada qoyska, ayaa saamayn karta qof kasta iyada oo aan ku xirnayn heerka dakhliga soo gala, jinsiyada, diinta, dhaqanka, awooda ama qofku rag iyo dumar midkuu yahay.

Rabshada qoysku waxay ka dhexdhici kartaa dadka isqaba, dadka wada nool, dumarka wada nool ama ragga wada nool, dadka iinta qaba oo ku tiirsan daryeelayaashooda, waalidiinta dhexdooda, carruurta iyo qaraabada. Xaalladaha qaarkood, rabshadu waxay noqon kartaa qof dhalinyara ah kaas oo dhib ku haya waalid ama qaraabo. Qof Aborijinaalla ama ka yimid Torres Strait Islander, 'qoys' wuxuu noqon karaa qaraabo sida waafaqsan dhaqanka ama hab-dhaqanka bulshada.

Adeegyada kaalmada lagu qoray dhamaadka qoraalkaan wuxuu bixin karaa macluumaad aad u badan.

Waa maxay dhibaatayntu?

Labo qof oo kasta oo wada nool ama is-qabaa waxay yeellan karaan khilaaf. Is-qabitaanka leh sinaan iyo ixtiraam, labada qofba waxay dareemaan inay muujiyaan aragtidda, laba qof kala yihiin, ayna diidi karaan galmoodka marka loo baahdo. Laakiin arrintu sidaas maaha marka dhibaato jirto. Xiriirka dhibaatada leh, qof ka mid ah labada isqaba ayaa reerka ku maamula gacan ka hadal, dhaleecayn, amar ku taaglayn, handadaad, ama cadaadis galmood.

Rabshada qoyska ama waxyeelayntu waxay noqon kartaa mid muuqata ama mid aan soo shaacixin. Waxay noqon kartaa mid hal mar ah ama wax muddo socday.

Dhibanaha iyo carruurteeda, dabeecadaani waxay ku noqon kartaa mid leh khatar, cabsi, jaahwareer iyo dhaawac.

Rabshada qoyska iyo waxyeelayntu waxay xadgudub ku tahay xuquuqda aadamiga sinana laguma aqbali karo, bulsho iyo dhaqan walba.



'Qoyska iyo saaxiibaday uma malaynayn inay "sidaas u xun tahay" sababtoo ah hal mar keliya ayuu I garaacay. Laakiin xaqirida iyo madax ka haysashada ayaa ka sii xumaa, sida uu u kantaroolayey naftayda. Waxaan jeclaan lahaa in qoyskaygu u arki lahayeen sida ay u xumayd'. Kate.

Dhibaataynta shucuureed ama maskaxeed ayaa la mid ah mida jireed.

Dhibaataynta marna lama aqbali karo, iyada oo aan ku xirnayn xaallada, marnana ma noqon karto qaladka dhibanaha. Khamradu ma keento dhibaataynta, ama wallaac, ama dabeecada dhibanaha. Dhibaatayntu waxay ku dhacdaa dhibaateeyaha ayaa doonaya inuu kantaroolo madaxana ka haysto qofka kaleeto.

Fiktooriya gudaheeda, sharcigu wuxuu aqoonsan yahay in rabshadu aanay ahayn keliya gacan ka hadal – waxaa ku jira kantaroolida iyo wax-ku-dirqinta [arag *Family Violence Protection Act (2008)*]. Tusaalayaasha waxaa ku jira ka joojinta qof inuu arko reerkiisa iyo saaxiibadiis, ugu cagajulaynta in wax la yeellayo, ihaanaynta, cabsigelinta, caayida, dhaleecaynta joogtada ah ama erayada jinsiyada la xiriira. Waxaa ku jiri kara ka qaadida daawadeeda, ka ilaalinta lacagta ay ku gadato cunto ama dhar, ku cabsigelinta in uu sheegayo xaalladeeda galmoodka marka aanay doonayn in la ogaado. Waxaa kaloo ku jiri kara burburinta hantida, xumaynta iyo daandaansiga.

Rabshada qoyska, u xoogsheegashada, faraxumaynta iyo daandaasiga lama aqbali karo waxaana loo sheegi karaa booliiska.

Sidee ku aqoonsan karaa waxyeellaynta ama dhibaataynta?

Waxaa laga yaabaa in aadan ogaan karin haddii waxa saaxiibadaa ama qarabaada haystaa yahay 'dhibaatayn'. Waxaa laga yaabaa inaad qabto dareen ah in wax 'ka qaldan yihiin' guurkeeda. Mararka qaarkooda waxaa laga yaabaa inay jiraan calamaado muujinaya in dhibi jirto. Laakiin badanaa wax muuqdaa ma jiraan.

Waa kuwaan calaamadaha muujinaya in ay jiraan dhibaatayn:

- Waxay u muuqataa in ay ninkeeda ka baqayso ama had iyo jeer ay doonayso inay ka farxiso.
- Waxay joojisay arkida saaxiibadeed iyo ama qoyskeeda, ama waxay goysay kula sheekaysiga telefoonka marka ninkeedu guriga joogo.
- Ninkeedu had iyo jeer wuxuu ku dhaleeceeyaa ama ku ihaaneeyaa dadka kale hortiiisa.
- Waxay tiraahdaa ninkeeda ayaa igu khasbay galmood ama igu cadaadiyey.
- Ninkeedu badanaa wuu amraa ama wuxuu sameeyaa dhamaan go'aanada (tusaale ahaan wuxuu kantaroolaa dhamaan lacagta, wuxuu u sheegaa cidday arki karto ama aanay arki karin iyo waxay samayn karto).
- Waxay badanaa ka hadashaa 'masayrka ninkeeda', xanaaqa badan' ama 'yeelashada'.
- Way welwelsan tahay ama niyad jabsan tahay, waxay lumisay kalsoonideeda, ama badanaa waa aamusan tahay.
- Waxay leedahay dhaawacyo jireed (jugoh, lafa jabay, murkacasho, meel go'an iwm). Waxaa laga yaabaa inay ka bixiso sharaxaad aan macquul ahayn dhaawacyo jireed.
- Carruurteedu waxay u muuqdaan kuwa ka naxsan ninkeeda, waxay qabaan dhibaatooyin dabeecadeed, ama waa maahsan yihiin. Way diidan tahay inay uga tagto caruurteeda ninka.
- Marka xiriirkoodu dhamaado, ninkii ay kala tageen joogto ayuu u soo wacaa, daba-galaa wuxuu yimaadaa guriga ama wuxuu ku sugaa dibada.

Maxay u goyn weyday xiriirka guurka?

Waxay noqon kartaa arrin aad u adag sababta qof ugu jiri karo guur haddii si xun loola dhaqmay. Ka tegidu waxay u muuqan kartaa xal sahlan. Waxaa laga yaabaa inaad u malayso in dhibtu iyada ka timid sababtoo ah way u dulqaadatay, ama waa daciif ama waa doqon haddii ay la sii joogto.

Waa adag tahay in la maleeyo waxay tahay in qof la yeello marka aadan adigu xaalladaas ku jirin. Dibada, waxay u muuqataa inay sahlan tahay inaad ka baxdo marka loo fiiriyo siday u muuqato.

Waxay noqon kartaa wax adag in laga takhaluso guur leh nin dhib sameeya. Tan ayaa ah wax muhiim u ah saaxiibada iyo qoysasku inay fahmaan.

Waxa jira sababa badan oo kecnaya inay adag tahay in la baabi'yo guurka.

- **Waxay ka cabsi qabtaa waxa ninku samayn karo haddii guurka la burburiyo.** Qofka dhibta wada waxaa laga yaabaa inuu ku cabsi geliyey inuu waxyeellayo iyada, qaraabadeeda, carruurteeda, hantideeda iyo marabideeda. Waxaa laga yaabaa inuu ku handadu inuu isdilayo hadday ka tagto. Dhibanayaal badan ayaa ogaaday in dhibtu sii socoto kana darto markay qofka is-furaan ka dib.
- **Way jeceshahay ninkeeda,** sababtoo ah badanaa dhibaato ma sameeyo waqti walba.
- **Waxaa ku weyn guurka** ama waxay aaminsan tahay in guurku yahay ebed 'ha fiicnaado ama xumaadee'.
- **Waxay rajeynaysaa in ninkeedu isbedelayo.** Mararka qaarkood dhib sameeyaha ayaa ballan qaada in uu isbedelayo. Waxaa laga yaabaa inay u malaynayso haddii uu joojiyo khamra cabida, dhibtu inay istaagayso.
- **Waxay u malaynaysaa in dhibta ay iyadu wado.**

- **Waxay dareemaysaa inay ninkeeda la joogto carruurta darteed**, ayna carruurta u fiican tahay in carruurta la noolaadaan labadooda waalid. Waxaa laga yaabaa in ninkeedu ku handaday inuu carruurta qaadanyo ama waxyeellayo.
- **Kalsooni la'aan.** Qofka dhibta sameeyaa wuxuu si ula kac ah isugu deyi doonaa in uu burburiyo kalsoonida qofka la nool, kana dhaadhiciyey inay tahay doqon, raja-beel, ayna masuul ka tahay dhibta. Waxaa laga yabaa inay dareento daciif go'aana aanay samayn karin.
- **Cidlayn iyo kelinimo.** Qofka dhibaataada wada ayaa laga yaabaa in uu ka gooyey saaxiibadeed iyo ehelkeeda. Waxaana laga yaabaa in aanay keli ahaan noolaan karin. Haddii Ingiriisku aanu ahayn afkeeda kowaad, waxaa laga yaabaa inay cidla sii dareento.
- **Reerka, jaalliyada ama masjidka oo cadaadis ku saara in ay la joogto ninkeeda.** Waxaa laga yaabaa inay ka cabsi qabto inay gooyaan jaalliyada iyo qoyskeedu haddii ay ka tagto ninkeeda.
- **Haddii ay ka timid dhaqan kale ama luqad kale, ninkeeda ayaa laga yaabaa inuu ku handadu in uu u sheegayo dawlada ama immigrayshanka haddii qof kale u sheegto rabshada.**
- **Waxaa laga yaabaa in aanay ka tegi karin ninkeeda** sababtoo ah waxay ku nool yihiin meel magaalada ka baxsan, ama isku saaxiib ayay leeyihiin ama isku qawmiyad ayay ka tirsan yihiin, ama Aborijinal ama jaalliyad diimeed.
- **Ma laha si ay ku noolaato haddii guurku burbuuro.** Waxaa laga yaabaa inay ka welwesho halkii ay ku noolaan lahayd, sidii ay ku heli lahayd lacag ama gaadiid, khaasatan haddii ay ku nooshahay meel cidla ah. Waxaa laga yaabaa inay ku tiirsan tahay dakhliga soo gala ninkeeda.
- **Haddii ay iin leedahay, waxaa laga yaabaa inay si buuxda ugu tiirsan tahay caawimada ninkeeda.**

Waa muhiim in aadan ka dhigin inay dareento inay wax ka qaldan yihiin iyada sababtoo ah kama aanay tegin ninkeeda. Tani waxay sii xoojinaysaa kalsooni xumadeeda iyo inay dareento inay masuul ka tahay qaladka isna eedayso.

Burburinta guurka nin dhib-wade ah wuxuu mararka qaarkood ahaan karaa mid khatar ah. Dhibtu way sii socon kartaa ama siyaadi kartaa ka dib markay guriga ka tagto. Ka caawin inay go'aansato waxay qaban karto, iyo inay ka fiirsato amaankeeda ama ha joogto ama tagtee. Waxaa laga yaabaa inay la xiriirto mid ka mid ah adeegyada ku yaalla tusahaan gadaashiisa si ay ugala hadasho siday u xafidi lahayd nafteeda.



'Markaan u sheegay siduu ii dhibaateeyey, saaxiibtay waxay igu tiri "laakiin adaa u ogolaaday inuu sameeyo" sidii ay anniga qaladkayga tahay. Taasi way iiga sii dartay. Ma ogayn cadaadiska ay igu haysay in aan ku noqdo, markuu yiri waa ku jeclabay waana isdilayaa intii aan adiga iyo carruurta la'aantood noolaan lahaa. Wuxuu iga dhigay eedayane. Waxaan ka fekeray siday muhiim ugu ahayd carruurta inay aabbe leeyihiin. Waxaas oo dhami waxay ahayd in uu igu qanciyo in aan soo noqdo. Saaxiibtay waa joojisay inay ila hadasho ka dib markaan dib ugu noqday ninkii, waxay ii sheegtay in aan doqon ahay. Aad ayaan uga xumaaday sababtoo ah waxay ahayd saaxiibka keliya ee aan ku lahaa Australia run ahaana waxaan u baahnabay qof aan la hadlo, igana caawima in aan arko waxa la igu samaynayaa inay qalad tahay'. Nicola

Door ma ka qaadan karaa?

Dad badan ayaa ka welwela inay 'faragelin' ku samaynayaan hadday ku lug yeeshaan, ama arrintaasi tahay 'arrin barayfit ah'. Laakiin waxaa taas ka daran in qof dhib lagu hayo aadan waxba ka oran. **Caawimadaadu wax badan ayay ka qaban kartaa.** Waxaa laga yaabaa inaad waji gabax kala kulanto haddii aad u tagto iyada ayna diido kaalmadaada ama kuu sheegto shakigaagu waa inuu qaladan yahay. Laakiin haddaad si hufan oo taxadaran ula hadasho, adiga oo aan ku qalafsanaan, dadka badankiis waa qadarin doonaan aragtida welwelka leh, xataa haddii aanay diyaar u ahayn inay ka hadlaan xaalladooda. Uma badna inaad xaallada uga sii darto 'adoo muujinaya dareenkaaga'.

Sidee ula hadli karaa?

Ula hadal saaxiibkaa ama qaraabadaada si taxadaran, una sheeg waxaad ka welwelsan tahay. U sheeg inaad ka welwelsan tahay iyada, sababtana u sharax. Tusaale ahaan, 'waan kaa welwelsananahay sababtoo ah waxaan dareemay in aadan waayadaan faraxsanayn'.

Ha la yaabin haddii ay difaac gasho ama diido kaalmadaada. Waxaa laga yaabaa in aanay diyaar u ahayn inay aqbasho in la dhibaateeyo, ama ay ka xishoonayso kana baqayso ka hadlida wixii ku saabsan arrinta. Waxaa laga yaabaa inay dhibaato ku qabto cid aaminida ka dib dhibaataaynta. Haddii dhibanuhu nin yahay, waxaa laga yaabaa in uu ka qajilo ka hadlida dhibaataaynta maadaama laga yaabo in uu ka welwelayo in loo arko 'daciif' ama 'dadnima xumo'.

Ha ku riixin qofka inuu ka hadlo haddii aanu ku qanacsanayn, laakiin u sheeg inaad diyaar u tahay inaad la hadasho haddii ay u baahan tahay inay hadasho. Sabur yeello, dhegtana u taag wax kasta oo muujinaya inay diyaar u tahay inay ka hadasho dhibaataaynta.



'Qoyskaygu waa ogaayeen in dhibaato lay geysto oo aan debin galay, laakiin waxba ma ay oran ilaa aan ka tegay. Way I caawimi lahayd haddii ay oran lahaayeen dabeecadiisu ma fiicna, sababtoo ah waxaan u qaatay inay caadi tahay. Haddii ay oran lahaayeen qof fiican baan ahay waana I caawimayaan haddaan u baahnahay, aad ayey iigu sahlanaan lahayd in aan dhibta ka baxo'. Ellie

Maxaan samayn karaa si aan u caawimo?

Waxa ugu muhiimsan oo aad samayn kartaa waa inaad dhegaysato adiga oo aan xakumin, ixtiraamaya go'aankeeda, kana caawimaya inay hesho hab ay isugu kalsoonato amaana u hesho.

- Dhegayso waxay ka hadlayso.
- Aqbal waxay kuu sheegto. Wax badan ayay qaadansaa inay kula hadasho. Waxay u badan tahay dadka inay qariyaan waxna aanay ka soo qaadin dhibaataaynta, halkii ay been-abuuri lahaayeen ama ka badbadin lahaayeen. Waxaa laga yaabaa inay kugu adkaato inaad malaysyo qof aad taqaan in uu si xun u dhaqmo. Laakiin qofka dhibta sameeya ayaa dabcan ku tusinaya dhinac ka duwan dhinaca dhibanaha.

'Maaha inaad si buuxda u fahamto inaad caawima bixiso. Waxa keliya oo aad samaysaa waa inaad siiso waqtigaaga adiga oo aan xakun ridin'. Jane.

- **Dhibaataynta u qaado dhab.** Dhibaatayntu waxay noqon kartaa mid dhaawac ah jireed ah iyo mid shucuureedba ah. Ha yaraysan khatarta ay ku jirto.
- **Ka caawin inay garato dhibaataynta fahamna** siday u saamaynaysa iyada ama carruurteeda.
- **U sheeg inay geesiyad ahayd** inay awooday inay ka hadasho dhibta, ayna awooday inay ku soo noolaaday xaalladaas.
- **Ka caawin inaad dhisto kalsoonideeda.**
- **Ka caawin inay fahamto in dhibtaasi aanay ahayn qaladkeeda** aana cida istaahilin in la dhibaateeyo, iyada oo aan ku xirnayn waxay sameeyeen. Ha ogaato inaad u malanayso sida ninkeedu ula dhaqmayaa inay tahay qalad. Tusaale ahaan, 'ma jiro qof' xataa ninkaaga, xaq u leh in uu si xun kuula dhaqmo.
- **Ka caawin inay nafteeda xafido.** Waxaad oran kartaa 'waxaan ka welwelsanahay wuxuu kugu samayn karo adiga ama caruurta' ama 'waxaan ka welwelsanahay inay ka sii xumaato'. Kala hadal siday u malanayso inay isku xafidi karto. Arag qaybta 'Ka caawinta siday ku xafidi lahayd nafteeda' (bogga 16aad).
- **Ka caawin inay ka fekerato waxay samayn karto** aragna sidaad ku caawimi karto inay hesho.
- **Arag caawimada runta ah** sida haynta carruurta waqti, cunta u karinta iyada, siinta meel amaana oo ay joogto, gey ama u raac maxkamada, iwm.
- **Ixtiraam xuquuqdeeda si ay u samayso go'aankeeda,** xataa haddii aadan ku raacsanayn iyaga. Ixtiraam dhaqankeeda ama diinteeda iyo taqaaliidada.
- **La samay xiriir joogta ah oo wanaagsan iyada.** Haysashada fursada joogta loogula hadlo saaxiib ama qaraabo waxay noqon kartaa wax muhiima.

- **U sheeg adeegyada la heli karo, kuwaas oo lagu sharxay tusahaan gadashiisa.** Xasuusi haddii ay u yeerto adeeg, waxay heli kartaa kaalmo iyo macluumaad, ku khasbi maayaan inay ka tagto haddii aanay doonayn. Adeegyada waxaa looga baahan yahay inay bixiyaan da'daal joogto ah, marka macna ma samayn mayso qolada ugu horaysa oo ay la xiriirtay, dhamaantood waa inay awoodaan inay siiyaan isla macluumaadkii.
- **Kala hadal sharciga iyada difaaci kara,** sida Amarka Faragelinta Rabshada Qoyska (Family Violence Intervention Order). Macluumaadka ku saabsan Amarka Faragelinta Qoyska, iyo macluumaadka kale ee ku saabsan waxa booliiska, maxkamadaha iyo adeegyada kaalmadu qaban karaan, aragna qaybta 'Sharciyada iyada xafidi kara' (bogga 18aad).
- **Sii kaalmay markay ninka ka tagto ka dib.** Waqtiga kala tegidu wuxuu noqon karaa waqti khatar ah, maadaama dhibaatayntu siyaadi karto. Waxaa laga yaabaa inay u baahan tahay dhiirigelin si looga caawimo asaasida nolol cusub si ay uga soo kabsato dhibtii. Waxay kaloo raadin kartaa talabixin ama ka qaybgelida kooxda kaalmaynta.



'Runtii waxa caawimay waa haysashada qaraabo ama saaxiib haya caruurta in waqti ah. Waxaan u baahnaa waqti aan ku fekerato waxna kaga qabto dareenkayga carruurta oo aan ila joogin mar walba'. Soraya

Tusaalaha aad weydiiso iyo waxyaallaha aad u oran karto:

Waxaa jira fikrado. Waa muhiim inaad tiraahdo keliya waxaad aamisan tahay, aadna isticmaasho erayadaada.

- ‘Sida uu kuula dhaqmaa waa qalad.’
- ‘Maxaan samayn karaa si aan kuu caawimo?’
- ‘Sidee u malaynaysaa inay dabecacdiisu kuu saamaysay?’
- ‘Sidee u malaynaysaa inay dabecacdiisu kuu saamaynayso?’
- ‘Waxaan ka welwelsanahay wuxuu kugu samayn karo adiga ama carruurta.’
- ‘Maxaad u malaynaysaa inay tahay inaad samayso?’
- ‘Maxaad ka baqaysaa haddii aad iska furto?’
- ‘Maxaad ka baqaysaa haddii aad iska joogto?’



Waxa aan la samaynayn

Markaad la hadlayso qof la dhibaateeyey, waxaa laga yaabaa in waxyaallaha qaarkood aanay caawimayn, ama ka joojinayaan inay si buuxda kuugu xan qarsado.

Kuwaan ayaa ka mid ah waxyaallaha dhibanayaasha dhiba **aan** caawimayn

- **Ha ku eedayn dhibta** ama ha weydiin su’aallo sida ‘maxaad samaysay oo ku kalifay inuu sidaas kuulla dhaqmo?’ ama ‘maxaad ugu adkaysatay?’, ama ‘maxaad ilaa hadda ku jeceshahay?’ suaallahaas ayaa soo jeedinaya ilaa xad in waxani qaladkeeda yihiin.
- **Ha isku deyin inaad ogaato ‘sababaha’ dhibaataaynta.** Culayska saar qofka dhibta loo gaystay.
- **Ha ku adkaan** haddii ay tiraahdo weli waan jeclahay ninkayga, ama haddii ay ka baxdo dabadeedna ku noqoto guurka. Ka tegida ninka dhibta wada waqti ayay qaadataa, kaalmadaaduna aad ayay muhiim u tahay.
- **Ha dhaleecayn ninkeeda.** Dhaleecay dhibta una ogolow inay ogaato in aan qofna waxyeelli karin xuquuqdeeda (tusaale ahaan, dheh ‘ninkaagu maaha inuu sidaas kuulla dhaqmo’). Dhalacaynta ninkeedu waxay keenaysaa keliya inay difaacdo isaga ama iyada.
- **Talo ha siin,** ama u sheegin wixii aad samayn lahayd. Taasi waxay hoos u dhigaysaa keliya kalsoonideeda si ay go’aankeeda u samayso. Dhegayso macluumaadna sii, talo ha siin.
- **Ha ku cadaadin inay tagto** ama isku daydo inaad u samayso go’aano nafteeda. Diirada saar dhegaysiga iyo kaalmaynteeda si ay go’aankeeda u samayso. Iyadaa xaalladeeda qof walba ka badisa.

Ka caawimida siyaadinta amnigeeda

Ama ha la sii qabo ama ha ka tagtee, waa muhiim inaad ka fekerto sida looga xafidi karo dhibaato intaas ka badan.

Waxaad awoodaa:

- Inaad ka caawinto halkii ay iyada iyo carruurteedu aadi lahaayeen haddii wax degdeg ahi dhacaan, ama hadii ay go'aansato inay tagto. Haddii ay doonayso inay joogto meel qarsoodi ah, u sheeg adeegyada degitaanka meel amaana (qaxooti). Wac Adeega *Women's Domestic Violence Crisis Service* si aad u ogaato macluumaad intaas ka badan. Haddii ay ku hadasho af aan ka ahayn Ingiriiska, ama qofku leeyahay dhaqan kale, waxaa loo xawili karaa adeega dumarka soogalootiga ah ee loo yaqaan *Women's Domestic Violence Crisis Service* (arag bogga 26aad).
- Isku raaca baaq ama calaamad aad isla ogtihiin inay kuu iclaamiso inay u baahan tahay caawimo.
- Ka caawin inay diyaarsato sabab si ay degdeg ugaga baxdo haddii ay dareento cabsi.
- Ka caawin inay diyaarsato 'boorsada cararka' oo ay ku jiraan waxay rabto inay horay u sii qaadato, kuna qari meel amaana. Haddii ay tagto waxay u baahanaysaa lacag, furayaal, dhar, kaararka bangiga, laysanka dareewalka, warqada dhalashada, dukumintiga damaanada bulshada, guriga dukumintigiisa, daawada, baasaboorka iyo dukuminti kale oo kasta oo muhiim u ah iyada iyo carruurteeda.

- Kala hadal sida booliisku ku badbaadin karo. Booliisku wuxuu leeyahay mabaadii qayaxan oo khusaysa waxay samayn karaan si ay u siyaadiyaan amniga dumarka iyo carruurta. Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan wixii booliisku qaban karaan sida Amarada Faragelinta arag 'sharciyada xafidi kara iyada' (arag bogga 18aad).
- Haddii ay go'aansato inay joogto, waxaa laga yaabaa inay u baahan tahay siyaaba kale oo ay kaga xafido nafteeda iyo carruurteeda rabshad intaas ka badan. Wac mid ka mid ah adeegyada ku yaalla tusahaan gadaashiisa wixii fikrad ah. Amarka Faragelintu wuxuu yeellan karaa shuruudo ku amraya ninkeeda dhibta wada in aanu u dhawaan guriga qoyska. Xaalladaan, waxay awoodi doontaa, inay bedesho furayaasha guriga waxayna dalban kartaa in la bedelo heshiiska guriga oo magaceeda lagu qoro, xataa haddii aanay markii hore heshiiska ku jirin.
- Haddii ay doonayso inay dalbato Amarka Faragelinta ama qaado talaabo sharci ah, waxaad bixin kartaa caddayn markhaanti ahaan. Haddii aad dareento inaad bixin karto, qoro waxaad aragtay, sida waqtiga, taariikhda, iyo waxaad aragtay.

Macluumaad intaas ka badan arag websaytka www.dvrcv.org.au *Domestic Violence Resource Centre Victoria* ama wac (03) 9486-9866. Fadlan arag 'Adeegyada caawimi kara' qaybta talada sharciga.

Sharciyada xafidi kara iyada

Booliiska waxaa ka go'an inay wax ka qabtaan dhamaan arrimaha qoyska ee rabshada, waxaana saaran waajib ah inay dadka xafodaan, kuwaas oo ay ku jiraan caruurta. Booliisku wuxuu ka qaadi karaa talaabo xataa haddii aanay doonayn.

Amniga ayaa ah waxa ugu horreeya. Taas waxaa ku jira amniga booliiska iyo dadka jooga, khaasatan carruurta. Haddii ay khatar ku jiraan, booliisku waxay qaadi doonaan talaabo degdeg ah si ay u ilaaliyaan una xafidaan. Wac nambarka xaalladaha degdegta ah '000' weydiina inaad la hadasho booliiska.

Haddii aanay xaalladu degdeg ah ahayn, waxaad wici kartaa rugta booliiska agteeda ah. Fiiri buuggaan qoraalka gadaashiisa websiteka booliiska Fiktooriya faahfaahinta meelaha lagala xiriiirayo.

Haddii ay dhibaato ku qabto fahmida ku hadalka Ingiriiska, waxaa waajib ah inay u sheegto booliiska ugu horreeya oo ay la hadasho si ay ugu hellaan turjubaan sida ugu dhaqsaha badan.

Marka booliisku yimaado, waxay xaqiijin doonaan in iyada iyo reerkeedu ay yihiin aamaan. Booliisku waxay baari karaan guriga waxayna qaadayaan wixii hub ah ee yaalla. Waxaa waajib ah inay u sheegto qofta dhibta loo geystay haddii qofka la noolaa haysto hub.

Booliiska ayaa kala hadli doona wixii dhacay. Waxay go'aan ka gaari karaan inay qaadaan talaabo haddii aanay doonayn sidaas, waxayna u sheegi doonaan ninkeeda in go'aankani ka yimid booliiska.

Booliisku waxay u gudbin doonaan adeega kaalmada wixii kaalma ah ee la xiriira sharciga, dhaqaalaha, iyo shucuurta. Adeegyadaani waxay kaloo ka caawimi karaan iyada iyo carruurta inay hellaan meel amaana oo ay aadaan, haddii ay doonayso inay ka tagto guriga. Booliisku waxay xiri doonaan qofka dhibta wada, ama way qaban karaan waxayna ku khasbi karaan inuu guriga ka tago.

Faragelinta iyo lug ku yeelashada booliiska macneheedu maaha inuu dhamaaday cilaaqaadkii, taasi iyada ayay la jirtaa. Si kasta ha ahaatee, haddii ay haysato amarka faragelinta welise ay la nooshahay qofkay isqabeen, dhibtuna sii socoto, booliiska ayaa qaadi doona talaabo siyaada ah. Booliiska ayaa ka caawimi doona wadadii ay qaadi lahayd.

Si looga caawimo dadka rabshada qoyska, booliisku waxay leeyihiin awoodaha soo socda:

Amarada Faragelinta Rabshada Qoyska

Amarada Faragelinta Rabshada Qoyska (Amarka Faragelinta) waa amar maxkamadeed oo ay gaartay maxkamada Magistrate-ku. Ujeedeedu waa ka xafidida dhibanaha iyo carruurteeda xubin qoyskeeda ka mid ah, ama qof ay leeyihiin xiriir dhow. Waxay qaadan kartaa Amarka Faragelinta xataa haddii aanuu jirin rabshad jireed.

Amarka Faragelinta wuxuu leeyahay shuruudo u sheega qofka kaleto ('eedaysanaha') wixii ay samayn karaan iyo waxa aanay samayn karin. Tusaale ahaan, maxkamada ayaa ku xakumi karta eedaynuhu inuu:

- ka joojiyo hagardaamaynta, cabsigelinta ama handadaada
- inuu joojiyo inuu u soo jirsado guriga masaafa mucayin ah
- joojiyo la xiriirida sinaba, sida email, SMS iyo telefoon
- joojiyo waxyeellida gurigeeda ama hantideeda.

Waxaa ku jiri kara shuruud lagaga dhigayo ninkeeda dhibwadaha ah inuu ka baxo guriga qoyska. Waxaa dhici karta inay dalbato in heshiiska lagu wareejiyo guriga xataa haddii aanay horay ugu jirin heshiiska ijaarashada.

Khadka Caawimada Dhibanaha Dembiga (Victims of Crime Helpline) 1800 819 817 wuxuu bixin karaa macluumaad intaas ka badan oo ku sabasan xalkaan.

Ninkeeda dhibta wadaa waxaa waajiba inuu u raaco xeerarka Amarada Faragelinta sida saxda ah. Waa gaf dembiyeed in uu qof diido Amarada Faragelinta. Haddii lagu helo dembi waxaa laga yaabaa in la ganaaxo ama uu xabsi galo.

Fadlan eeg meelaha lala xiriirayo oo ku yaalla buuggaan gadaashiisa sida loo dalbado Amarka Faragelinta iyo talo kaalmo kale.

Ogeysiisyada Amaanka Rabshada Qoyska

Sarkaalka booliiska ayaa dalban kara ogeysiiska Amaanka Rabshada Qoyska (Ogeysiiska Qoyska) haddii maxkamadu aanay furnayn arrintuna degdeg tahay. Tani waa inay dhacdaa ka hor 9ka subaxii ilaa 5galabtii maalmaha shaqada, ama Axada iyo Sabtida iyo maalmaha ciida.

Sarkaalka booliiska ayaa bixin kara ogeysiiska amaanka hadduu aaminsan yahay xafidaad degdeg ah, si loo ilaaliyo ilma loo geystay rabshad qoys, ama lagu xafido hanti.

Sarkaalka booliisku wuxuu dalban karaa Ogeysiinta Amaanka xataa haddii dhibanuhu aanu doonayn. Sarkaalka ayaa u caddayn doona xubinta qoyska ee dhibta qaba oo codsanaya Ogeysiiska Amaanka inay tahay go'aan booliis.

Ogeysiinta Amaanku waxay bixisaa xafidaad ku meel gaar ah, waana dalabka Amarka Faragelinta ay tahay in la geeyo maxkamada 72 saacadood. Dabadeedna Magistrate-ka ayaa maqli kara arrinta go'aana ka gaari kara waxa markaas ka dib dhacaya.

Si loo ilaaliyo xubnaha qoyska, booliisku waxay ku dari karaan xaallada Ogeysiinta Amaanka in qofka dhibta sameeyaa (eedaysane) inuu ka baxo guriga. Taas macneheedu waxa weeye in aanu ku noolaan, dib u soo gelin ama booqan guriga ilaa arrinta la geeyo maxkamada. Magistrate-ka ayaa markaas ka dib go'aan ka gaari doonta waxa dhici doona. Haddii eedaysanuhu aanu haysan meel uu joogo, booliiska ayaa samayn doona wixii karaankooda ah si ay uga caawimaan deegaan degdeg ah.

Haddii ninkeedu diido inuu ka baxo ama ku soo noqdo guriga qoyska, booliiska ayaa isticmaali kara xoog macquulla si guriga looga saaro. Booliiska ayaa sidaas oo kale ku soo eedayn kara gaf dembiyeed.

Haddii ay haysato carruur, waa lagu dari karaa Amarka Faragelinta, ama Ogeysiinta Amaanka, si loo xaqiijiyo inay nabad qabaan.

Fadlan eeg meelaha lala xiriirayo oo ku yaalla buuggaan gadaashiisa sida loo dalbado Amarka Faragelinta iyo talo kaalmo kale.

Waa muhiim inaad cadaadisoo saaxiibkaa/qaraabada in lala hadlo booliiska, khaasatan haddii aanay ku qanacsanayn arrintaan. Si kasta ha ahaatee, waxaad muujin kartaa welwelka xaalladeeda adiga oo kala hadlaya iyada wixii ku saabsan xalalka la heli karo.

Maxaan samayn karaa haddii aan markhaanti ka noqdo ama dusha ka maqlo rabshad ama cabsigelin?

Haddii aad aaminsan tahay khatar degdeg ah oo jireed iyada iyo carruurteedu inay ku jiraan, ama ku socdaan, khatar galaan, ka wac booliiska telefoonka 000 sida ugu dhaqsaha badan.

Haddii aadan haysan firsad aad kula hadasho iyada waqti kale, weydii haddii ay rabto in booliiska la waco iyo in kale. Waxaa laga yaabaa inay ka cabsi qabto in wicida booliisku ay xaalladeeda kaga sii darto. Dad badan ayaa ka cabsi qaba in booliisku arrintooda lug ku yeeshaan, khaasatan dadka ka tirsan kuwa aan Ingiriiska ku hadlin ama bulshada asaliga ah leh khibrad aad u xun oo hore. Waxaad ugu yeeri kartaa adeega rabshada qoyska si loo helo sidaad ku caawimi karto.



'Deriskeena ayaa waxaa daandaansaday saaxiibkeedii hore. Wuxuu ka daawadaa guriga dibadiisa. Mararka qaarkood waxaan maqalaa isaga oo ku qaylinaya iyada oo deyrka joogta. Ma hubno haddii booliis u yeeridu xaallada ka dhigayso mid cakiran. Iyadaan weydiinay. Waxaan ogolaanay in aan wacno iyada haddii aan aragno isaga oo daawanaya gurigeeda, si ay ugu yeerato wallaalkeed inuu u yimaado. Haddii aan u malayno in aan maqalay saaxiibkeedii hore, waan wici karaa iyada waxayna adeegsan kartaa eray noo iclaaminaya in aan wacno booliiska.' Mark

Is-amaa gelintaada

Kaalmaynta saaxiib iyo qaraabo la dhibaateeyey waxay noqon kartaa wax jaahwareer ah, cabsi leh oo kadeed ah. Waxaad u baahan tahay inaad xafido naftaada aadna hesho kaalmo.

Dareemida jaahwareerka ama xanaaq in aanay burburin guurkii

Xasuuso inaad u ogolaato inay ogaato inaad jaahwareersan tahay ama ka xun tahay in aanay caawimayn iyada, waxaa laga yaabaa inay arrinta uga sii darto. Ha ka daalin, iyada oo aan ku xirnayn go'aankeeda, sharax cabsidaada, laakiin u sheeg inaad doonayso inaad caawinto. Xasuusi naftaada in kaalmadaadu tahay muhiim, ayna ku yeelanayso saamayn weyn, xataa haddii aanay muujin karin xaalladaan hadda. Marna ha yaraysan qiimaha kaalmadaada.

Dareemida cabsi ama 'ka bixid dhibta'

Naftaada u hel kaalmo. La hadal saaxiib kale ama la xirii adeeg wixii macluumaada oo waxaad samayn karto.

Waxaad dareemaysaa cadaadis ah in aad caawinto ka badan intaad awoodoe

Daacad ahaw wixii ku saabsan nooca kaalmada ah oo aad bixin karto. Naftaada ha ku khasbin wax aadan awoodin – waxaad awoodi kartaa keliya inaad si buuxda u kaalmayso iyada haddii aad adiga naftaadu is xafidi karto. Xasuuso in aadan masuul ka ahayn dhibta, aadna 'badbaadin karin iyada'. Waxaad kaloo kaalma ka heli kartaa adeegyada ku taxan tusahaan gadaashiisa.

Sidee wax uga qaban karaa qofka la nool oo dhibta keenaya?

Taxadar. Naftaada ha dhigin boos halka qofku dhibta wadaa wax ku yeeli karo ama wuxuu rabo kaa yeeli karo. Ha isku deyin inaad faragelin ku samayso haddii aad markhaanti ka noqoto qof wax la yeelayo – wac booliiska.

Haddii qof wax la yeellay dhib samaynayo yahay saaxiibkaa ama qaraabadaada, waxaa laga yaabaa inaad dhexda gasho. Waa muhiim inaad fahamto haddii aad qofka u tagto kaas oo ah qof dhib wada, isaga ama iyada:

- ayaa laga yaabaa inay kuu sheegaan ‘inaad taada ka adkaato’
- inkirto waxyeellaynta, ama dhahdo, sidee uga fekeri kartaa in aan sameeyo waxaas wax la mid ah?’
- ugu muuji in aanay ‘aad u xumayn’, ama waxay dhacday hal mar
- u ekaysii inay qofka kale qaladkiisa tahay, ama in dabecadeedu ay tahay dhibta, oo aanay iyaga ahayn
- dheh naftooda ma caawin karaan, way cabsanaayeen, way ‘qaldameen uun’ ama waxay ‘lumiyeen kantaroolkii’.

Jawaabahaas midna ma oranayo isaga ama iyada ayaa qaldan. Waa wax guud in qof noqday shida wade uuna inkiro ama yaraysto dhibta. Dabcan sababta keliya oo aad ‘ku xaqiijin karto’ in qofku yahay dhibwade waa haddii qofkay isqabaan uu kuu sheego inuu yahay, ama aad adigu aragto dhibaataaynta. Dadka u muuqda ‘qof la ixtiraami karo’ iyo ‘caadi’ weli wuxuu noqon karaa dhibwade gurigooda marka la joogo.

Waa suurtagal in qofka dhibta wadaa uu ogolaado in dhibta uu isagu masuul ka yahay, laakiin yiraahdaan ma naqaan sidii loo joojin lahaa dabecadooda. Waxaa kaloo laga yaabaa inay inkiraan ama yaraystaan dhibta, laakiin ku raacaan waxyaalla qaldamay xaalladaha qaarkood. Haddii qofka dhibta wadaa yahay rag, waxaa lagu dhiirigelin karaa in uu u waco *Adeega Xawilida Ragga* wixii talo ah taas oo weli ah qarsoodi xagga joojinta rabshadiisa (arag faahfaahinta cidda lala xiriirayo dhamaadka tusahaan). Haddii qofka dhibta wadaa yahay dumar waxay la xiriiri kartaa Adeega Caafimaadka Bulshada.

Haddii aad aragto dhibaataayn, aadna dareento amni ama aad awoodo, ka hadal dabecad mucayina oo aad aragtay. Tusaale ahaan, *‘Labadiina waxaad tihiin saaxiibaday’ sidaad u dhaleecaysay una handaday gabadaha way iga welwelisay. Xafladii Sabtidii la soo dhaafay, waxaan maqlay inaad tiri... markii aad lahaydna wajigaagu wuxuu lahaa mid cabsi abuuraya’*. Iska ilaali samaynta eedayn degdeg ah oo ku saabsan qofka sida, ‘waan ka xumahay waxaad noqotay qof rabshad samaynaya’ taas oo laga yaabo inay qofka ka sii xanaajiso. Markaad si cad diirada u sii saartaba mucayina aad tahay wixii aad aragtay, qofka way ku sii adkaanaysaa in uu diido ama yaraysto wixii dhacay.

Haddii aad ogtahay keliya dhibta sababtoo ah dhibanaha ayaa kaala hadlay, kala hadal horta iyada inta aadan waxba oran ninkeeda. Ninkeedu wuxuu ahaan karaa mid dhibta sii siyaadiya haddii uu ama ay u malaynayso in cid loo sheegay.

Nin kala hadlaya nin kale, ama naag kala hadlaysa naag kale wixii ku saabsan dabeecada waxyeellaynta leh waxay noqon kartaa hab fiican oo arrintaan wax looga qabto. Diirada ha saarin inaad fahamto isku deyida sababta qofku u yahay dhibwade, ama isku deyida inaad ka shaqayso sida loo bedelo isaga ama iyada.

Ha isku deyin inaad sababayso dhibaataaynta. Dadka dhibta geystaa waxay u muuqan karaan kuwa aad isugu daya qancinta markay isku deyayaan inay beeniyaan, yareeyaan ama sababeeyaan dabeecada, maadaama ay sababayntaan u sameeyaan badanaa naftooda wixii ay samaynayaan. Diirada saar waxa qofka dhibta wadaa samaynayo, kuna dhiiri geli iyaga inay wacaan *Adeega Xawilaada Ragga* (arag bogga 28aad).

Haddii aad u baahnaan lahayd talo wixii ku saabsan kaalmada intaadan la hadlin qofka, waxaad wici kartaa *Adeega Xawilaada Ragga* ama *Adeega Qalalaasaha Rabshada Dumarka Soogalootiga* ah.



Adeegyada Caawimi kara

Booliis (Police)

Haddii aad markhaanti ka noqoto rabshad ama cabsigelin iyo waxyeellayn adigu. Wac '000' weydiina booliiska.

Macluumaad guud, booqo www.police.vic.gov.au ama booqo rugta booliiska agtaada ah. Rugaha booliiska qaarkood waxay leeyihiin saraakiisha U-qaybsan Rabshada Qoyska kuwaas oo ka jawaabi kara su'aallahaaga kuna siin kara macluumaad intaas ka badan.

Adeega qalalaasaha Rabshada Guriga ee Dumarka (Women's Domestic Violence Crisis Service)

Kaalmada qalalaasaha 24ka saac ee Gobolka ee oo dhan iyo deegaan amaan ah.

Tel: (03) 9322 3555
ama telefoonka lacag la'aanta ah: 1800 015 188

Adeega Rabshada Guriga ee Dumarka Soo-galootiga ah (Immigrant Women's Domestic Violence Service)

Kaalmada iyo Qalalaasaha Faragelinta dumarka soo galootiga ah in ka badan 25 luqadood.

Tel: 03 8413 6800
Websaytka: www.iwdvs.org.au

Xarumaha Lidka Faraxumaynta (Centres Against Sexual Assault (CASA))

Adeega daryeelka qalalaasaha ama xaalladaha degdegta ah ee 24ka saac kaas oo ah lacag iyo qarsoodi oo dhibanayaasha/samatabaxayaasha kuwaas oo dhowaan la faraxumeeyey. Kan waxaa ka mid ah kaalmada ka talasiinta qalalaasaha waxaana ka mid noqon kara daryeelka caafimaadka habka sharciga.

Tel: 1800 806 292 (24 saacadood)

Websaytka: www.casa.org.au

Xarunta Awoodgelinta Rabshada Guriga ee Fiktooriya (Domestic Violence Resource Centre Victoria)

Wuxuu siiyaa kaalmo telefoon oo bilaw ah, macluumaad iyo xawilaad si loo caawimo dadka khibrada u leh rabshada qoyska.

Tel: (03) 9486-9866

Isniinta ilaa Jimcaha, 9subaxii-5galabtii

Email: dvrvc@dvrvc.org.au

Websayt: www.dvrvc.org.au

Adeega Afcelinta iyo Tarjumida qoraalka (Translating and Interpreting Service (TIS))

Mautarjumiin luqada badan ku hadla.

Wac: 131 450, adeega 24ka saacadood.

Xaalladaha degdegta ah, had iyo jeer ka wac booliiska 000, waxay kuu raadin doonaan mutarjum.

Khadka Caawinta dhibanayaasha Dembiga (Victims of Crime Helpline)

Wuxuu siiyaa talasiin, talo iyo xawilaad dhamaan dhibanayaasha rabshada, kuwaas oo ay ka mid yihiin macluumaad la xiriiira maxkamada, diiwaangelinta dhibanaha iyo faahfaahinta caawimada dhaqaalaha.

Tel: 1800 819 817, 8.00subaxii-11.00pm

habeenimo Isniinta ilaa Jimcaha.

Macluumaadka Dumarka iyo is-dhaafsigu Xawilida (Women's Information & Referral Exchange (WIRE))

Telefoon ugu caqlicelinta iyo macluumaadka dumarka, u xawilida u caqli celiyayaasha agagaarkaaga ah.

Telefoon lacag la'aana: 1300 134 130

TTY: 13 36 77, Isniinta ilaa Jimcaha 9subaxii
ilaa 5casarkii

Websayt: www.wire.org.au

Caafimaadka Dumarka Fiktooriya (Women's Health Victoria)

Caafimaadka Dumarka Fiktooriya wuxuu siiyaa macluumaad lacag la'aana oo ku saabsan arrimaha khaaska ah oo ay ku jiraan rabshadaha qoyska. Kalkaalisada caafimaadka Dumarka iyo umulisoooyinka waxaana lagu hellaa kaalmo qof-qof ku salaysan.

Wac: (03) 8345 3045

Websayt: www.whv.org.au

Adeega Xawilaada Ragga (Men's Referral Service)

Lacag la'aan, qarsoodi iyo macluumaad qarsoodi ah oo ku saabsan adeegyada lagu caawimo raggu inay bedelaan dabecadooda xun.

Wac: (03) 9428-2899 ama lacag la'aan: 1800 065 973

9subaxii ilaa 9fiidkii, Isniinta ilaa Jimcaha

Websayt: www.mrs.org.au

Khadka caawimada carruurta (Kids Help Line)

Telefoon ugu caqli celinta carruurta iyo dadka dhalinyarada ah. Adeegaani wuxuu siiyaa kaalmo dadka Australiyaanka ah oo ka yar 18 sanadood isaga oo isticmaalaya email iyo ku caqlicelinta online-ka.

Lacag la'aan: 1800 55 1800

Websayt: www.kidshelp.com.au

Barnaamijka Caqlicelinta iyo Caawimada Dhibanaha (Victims Assistance and Counselling Program)

Wuxuu ka shaqeeyaa magaalaweynta iyo qaybaha Fiktooriya. Adeega waxaa ka mid noqon kara kaalmada meelmarka ah, guriga la tegayo, xawilaada iyo kaalmada qalalaasaha iyo xawilaada.

Si loo helo wixii ku saabsan xaqyeelashada telefoonka khadka Caawimada Dhibanayaasha tel: 1800 819 817, 8subaxii ilaa 11.00ka Isniinta ilaa Jimcaha.

Taraybuunalka ka Caawinta Dhibanaha Dembiga (The Victims of Crime Assistance Tribunal)

Waxay caawimaan dhibanaha dembiga iyaga oo siinaya caawimo dhaqaale (tusaale ahaan kharajka daawada iyo u caqlicelinta).

Wac: (03) 9628 7855 ama lacag la'aan: 1800 882 752
Websayt: www.vocat.vic.gov.au

Gargaarka Sharciga Fiktooriya (Victoria Legal Aid)

Wac si aad u hesho talo sharci ah iyo qoraallo waxa laga filanayo maxkamada, iyo qoraallada xaqiiqada ee ku saabsan Amarada Faragelinta iyo shuruucda rabshada qoyska.

Wac: (03) 9269 0120 ama lacag la'aan: 1800 677 402
Isniinta ilaa Jimcaha, 8.45 subaxii ilaa 5.15 casarkii
Websayt: www.legalaid.vic.gov.au

Adeega Sharciga Dumarka Fiktooriya (Women's Legal Service Victoria)

Sii adeegyada sharciga kuwaas o ay ku jiraan ka matalida maxkamada, iyo kula talinta telefoonka iyo xawilaada.

Wac: (03) 9642 0877 ama lacag la'aan: 1800 133 032

Xarumaha Midoobay ee Sharciga Bulshada (Federation of Community Legal Centres)

Wac: (03) 9652 1500 si laguugu xawilo xarunta sharciga kuugu dhow ee talada sharciga lacag la'aanta ah.

Adeega Sharciga ah ee Aborijiniska Fiktooriya (Victorian Aboriginal Legal Service)

Lacag la'aan 24ka saac iyo matalid xubnaha bulshada Koori-ga.

Wac: (03) 9419 3888 ama lacag la'aan: 1800 064 865

Ka hortagga Rabshada Qoyska Aborijinaalka iyo Adeega ka hortagga Sharciga (Aboriginal Family Violence Prevention and Legal Service)

Wuxuu siiyaa caawimo dhibanayaasha qoysaska rabshadu ku dhacday lana faraxumeeyey iyo bulshada ay saamaysay rabshadu.

Wac: (03) 9244 3333 ama lacag la'aan: 1800 105 303
Websayt: www.fvpls.org

Shabakada Maxkamada (Court Network)

Macluumaad iyo kaalmo ka hor, intay socoto iyo ka dib maxkamada.

Wac: 1800 681 614

Caqlicelinta iyo barnaamijyada kaalmada waxaa laga heli karaa Fiktooriya si loo caawimo dadka ay ku dhacday rabshada qoyska ama lagu dhibaateeyey guriga. Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan adeegyadaan waxaa laga helaa Xarunta Awoodgelinta Wax-ka-qabshada Rabshada Guriga Fiktooriya (03) 9486-9866 ama WIRE on 1300 134 130.

Koobiya intaas ka badan oo tusahaan ah, fadlan la xiriir Xarunta Awoodgelinta Wax-ka-qabshada Rabshada Guriga Fiktooriya (03) 9486 9866, ama Khadka Caawimada Dhibanayaasha tel: 1800 819 817.

Tarjumada tusahaan waxaa la heli karaa iyaga oo ku qoran luqadaha jaalliyadaha soo socda: Carabi, Barmiiis, Jayniis, Karooweshiyan, Dari, Dinka, Faarsi, Masidooniyan, Seerbiyan, Soomaali, Isbaanish, Turkish, Fiyatnaamiis.



Domestic Violence
Resource Centre Victoria



Department of Justice
and Department
of Human Services